

Siyaasadda JLIB- Ka Digtoonaanta Eryidda Ardayga

Ardayda waxaa dhici karta in la eryo xilli hore waxaana lagu eryi karaa kaliya awoodda maamulaha. Maamulaha ma soo dhowayn doono codsi taleefoon lagu sameeyay ama warqad lagu soo qoray oo ku saabsan ardayga xilliga hore la eryay aan ka ahayn haddii uu yahay mid wanaagsan codsigana ay sameeyeen waalidka ma'suulka ama qof kale oo awood u leh. Haddii laga shakiyo rasmi ahaanti qoraalka codsiga ah ee loo sameeyay ardayga xilliga hore la eryay, maamulaha ayaa arintaasi taleefoon ku hubsan doona. Dhammaan xaaladaha oo dhan, maamulaha ayaa hubsan doona codsiyada taleefoonka lagu codsaday.

Ardayga la eryi maayo xilli hore si uu dugsiga uga tago asaga oo qofvkasta ee la jira illaa uu qofkaasi yahay waalidka ama mas'uulka ardayga ama uu yahay qof waalidka/mas'uulka u oggolaaday arintaas.

Xaaladaha aan joogin waalidiinta ardayga ee ay yihiin kuwo la fogeeyay, maamulaha wuxuu soo dhowayn doonaa codsiga ka socda waalidka ardayga lagula dardaarmay kaasi oo maxkamada Colorado u dhiibayso mas'uuliyad tooska ah ee ku aadan canuga xagiisa iyo weliba kaas oo ah waalidka ama mas'uulka ku diiwaansan qoraalka dugsiga. Isbedelka ku dhaca xanaanaynta inta lagu guda jiro sannad dugsiiyeedka waxaa la tusin doonaa nuqulka shahaado ee amarka maxkamada Colorado oo wata awoodda wax xukumida.

Ma jiro arday laga wadaayo shaqada dugsigiisa si loogu diro sida fariin oo kale meel kale oo ka fog dhismooyinka dugsiga ee aan ka ahayn xaaladaha xad dhaafka degdega ah hadana kaliya waxaa sidaas lagu samayn karaa kadib marka la helo ogolaanshaha maamulaha.

La ansixiyay 1 Maarso, 1957 iyo 15 Abriil , 1971

Loo muraajaceeyay si loo waafajiyo habdhaqanka: taariikhda ansixinta buuga tusaalaha bixiya

TIXRAACA KALE EE LA EEGAYO.: JIH, Su'aalo Wayddiinta, Fatishaadda iyo Xiridda JLF, Ka warbixinta Ku xadgudubka Canuga/Ilaalinta Canuga